





Ka duwanaanshaha sababta saxda ah
A skille seg ut for rett sak



LIDA Portugal 
Sunniya Høiby-Øiset 
Mohamed Abdirashid  4

 Soomali  / norsk 







LIDA Stories

lidastories.net


**Ka duwanaanshaha sababta
saxda ah / A skille seg ut for rett**

sak

LIDA Portugal 
Sunniya Høiby-Øiset 
Mohamed Abdirashid (so), Espen 
Stranger-Johannessen (nb)



This work is licensed under a Creative Commons
[Attribution 4.0 International License](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0).
<https://creativecommons.org/licenses/by/4.0>



Edson waxa uu ku dhashay Angola, wax yar uun ka dib markii uu dalkoodu xornimada qaatay. Wuxuu ahaa wiil aad u dheer. Dhererkiisa awgeed ayuu kuwa kale kaga duwanaa. Dadkii hubka siin jiray carruurta si ay ugu dagaalamaan askar ahaan dagaaladii sokeeye waxay doonayeen wiilal isagoo kale ah.


...

Edson ble født i Angola, rett etter at landet ble selvstendig. Han var en veldig høy gutt. På grunn av høyden hans skilte han seg ut. Folk som ga våpen til barn for å kjempe som soldater i borgerkrigen, ville ha barn som ham.

Hadda oo uu qaan-gaaray, Edson wuxuu tababaraa carruurta qaxootiga ah iyo kuwa kale ee laga takooro bulshada. Mar, dhererkiisu waxa uu halis galiyay in uu carruurta la askaraynayo noqdo. Hadda, dhererkiisu wuxuu siinayaa awood uu dadka kale ku caawiyo inay dareemaan ammaan.

...


Nå som han er voksen, trener Edson flyktningbarn og andre som står i fare for å bli utestengt fra samfunnet. En gang hadde høyden hans gjort at han var i fare for å bli barnesoldat. Nå har høyden hans blitt en styrke for å hjelp andre til å føle seg trygge.



Hooyadii waxay ka cabsatay inay kaxaystaan,
markaas ayay go'aansatay inay u dirto inuu kula
noolaado habaryartii Portugal. Waxay u
malaynaysay inuu halkaas ku nabadgeli doono.

...

Moren hans var redd hun skulle miste ham, så
hun bestemte seg for å sende ham til Portugal
for å bo med en tante. Hun trodde at han ville
være trygg der.



Maalin maalmaha ka mid ah macalin ayaa
ogaaday sida uu ugu fiican yahay kubbadda
gacanta. Waxa uu ku biiray koox kubbadda
gacanta ah oo uu aad ugu guulaystay. Waxa uu
caan ka noqday iskoolka oo uu yeeshay
saaxiibo. Wuxuu kaloo noqday qof kalsooni!
badan.

...

En dag la en lærer merke til hvor god han var i
basketball. Han begynte på et basketballag og
gjorde det veldig bra. Han ble populær på
skolen og fikk mange venner. Han ble også mer
selvsikker.



Aad bay u adkeyd bilaawgii horre, maadaama
Edson uu u xiisay cimilada diiran, cunta
dhaqameedka iyo ugu badnaan, laabta gelintii
iyo dhunkashada hooyadiis.

...

Det var veldig vanskelig i begynnelsen siden
Edson savnet det varme været, den tradisjonelle
maten, og mest av alt morens klemmer og kyss.



Si fiican ugumuu hadli karin luuqada
Boortaqiiska, aad ayeyna ugu adkeyd inuu la
socdo fasaladiisa iyo la sheekeysiga saaxiibadiis.
Waxa uu iswaydiin jiray in ay tahay fikrad
wanaagsan in uu yimaado Portugal.

...

Han snakket ikke portugisisk så godt, og det var
veldig vanskelig å følge med i timene og
samtalene til klassekameratene. Han lurte på
om det egentlig var en god idé å komme til
Portugal.